Febraayo 2006

Daryeelka iyo Caafimaadka Ilmaha

Xaashida Macluumaadka waalidka

Kala hadlida mihnadlayaasha daryeelka xaalka ilmahaaga

Waayo aragnimada wanaagsan ee ilmaha ilmanimadiisa hore waxay dhacdaa marka shaqaaluhu bartaan xaalka qoyska ilmaha, khaasatan markay aad ugu fiirsadaan xiriirka ay leeyihiin qofka daryeelka siiya ee ugu muhiimsan ilmaha. Adiga iyo shaqaalaha ilmanimada hore ee jooga xarunta aad isticmaasho waxaad wada leedihiin dan guud oo asaasi ah: taas oo ah qanacsanaanta iyo samaqabka ilmahaaga. Xiriir adag oo wanaagsan oo dhexeeya waalidiinta iyo shaqaalaha ayaa muhiim ah xagga bixinta daryeel sarre oo carruurta la siiyo, waxayna wax weyn oo wax ku oolla u tahay qoyskaaga noloshiisa maalmeed. Shaqaalaha khibrada iyo aqoonta leh oo ixtiraama waalidka oo si dhab ah u doonaya wada-shaqayn ayaa ku siin kara kaalmo, dhiirigelin macluumaad iyo talo ku saabsan koritaanka ilmaha iyo xanaanaynta ilmaha.

Shaqaalaha ayaa u baahan xirfad iyo aqoon si ay si wax ku oolla ula shaqeeyaan waalidiinta, iyo shaqaale tira badan, kuwaas oo tababarkooda iyo khibradoodu ay diirada saarayso la shaqaynta carruurta, iyo xal u hellida la xiriirida iyo la hadlida waalidka oo ah loolan weyn. Dhinaca kale, wada xiriirka waalidka iyo shaqaaluhu wuxuu noqon karaa mid adag haddii waalidku filanayaan in lagu eedeeyo ilmahooda dhibaatadiisa ama ka cabsi qabaan in ilmahooda wax ka qaldan yihiin.

Waalidka ayaa ah kuwa caadufad ahaan ugu nugul marka laga hadlayo carruurtooda. Qaar badan ayaana yeesha 'dareemid khatareed'. Taas ayaana keenta inaad u qaadato dhaleecayn ama uu ku geliyo welwel hadal yar oo ka yimid shaqaalaha. Shaqaalaha ilmanimada hore ee mashquulka ah ayaa mararka qaarkood kuula hadla dariiqooyin kaa dhigi kara inaad dareento cabsi ama xasilooni daro.

Xiriirkaada-shaqayneed oo u dhexeeya waalidiinta iyo shaqaalaha ayaa aad uga duwan hab dhaqameedkii ku salaysnaa moodalada 'aqoon-yahan' oo si guud looga isticmaali jiray adeegyada bulshada iyo caafimaadka. Warbixin kooban oo moodaladaan ah ayaa muujinaysa qaar ka mid ah faraqyada u dhexeeya.

Moodalka aqoon-yahanka, shaqaaluhu waxay maleeyaan waaya-aragnimada waalidka, waxay qaataan doorka hogaaminta, badanaa iyagaa hadla waxayna siiyaan waalidka talo iyo awaamiir, waxayna badanaa muujiyaan aragtida ah in waalidku aanay waxba la socon ama in dabeecada xumi ay keentay dhibaatada ilmaha waana in shaqaaluhu xaliyaan. Taladu waxay ku salaysan tahay fikrada ah waxaa jirta hal aragti oo sax ah oo ay tahay waalidku inay qaataan, taas oo keenaysa in shaqaaluhu meel mariyaan aragtidooda iyo waxay aaminsan yihiin una xakumaan waalidka sida waafaqsan heerkooda aragtiyeed. Marka aan dhibaatada loo xalin karin si sahlan oo degdeg ah, waalidka oo caajisay darteed, waxaa laga yaabaa in la eedeeyo waalidka. Marka waalidku weydiiyaan su'aallo ama ku raaci waayeen shaqaalaha aragtidoodana shaqaaluhu waxay bilaabaan isdifaac.

Moodalka wada-shaqaynta, shaqaaluhu waxay ixtiraamaan waalidku siduu wax u aaminsan yahay, iyo goolka carruurtooda waxayna isticmaalaan aqoontooda iyo xigmadooda. Waxayna aamisan yihiin in waalidku la rabaan ilmahooda waxa ugu fiican, waxa ilmahooda ugu fiicnina wuxuu yimaadaa marka aqoonta waalidka iyo khiradu israacdo. Waxay fahamsan yihiin inay jiraan waxyaalla badan oo kala gedisan oo waalidku ogyihiin. Waxay qadariyaan in waxyaallaha sababa dhibaatooyinka dabeecada ay badan yihiin badanaana ku lug leeyihiin waxyaallo ka sarreeya waxay waalidku wax ka qaban karaan (tusaale ahaan, dabeecada kulul ee ilmaha, iinta, arrima qoys iyo bulsho). In kastoo aanay eedayn waalidka, shaqaaluhu waxay had iyo jeer u arkaan inay yihiin qayb ka mid ah xalka. Iyagoo wada jira, shaqaalaha iyo waalidku waxay raadiyaan sidii lagu xalin lahaa xaallada. Shaqaaluhu waxay ixtiraamaan awooda khilaaf xalinta ee waalidka waxayna ujeedadeedu tahay ku awoodgelinta talo soo jeedin, macluumaad iyo istaraatiijiyo loogu talo galay in lagu gaaro hadafka la hanan karo ee ilmaha, had iyo jeerna waxaa go'aanka loo daayaa waalidiinta. Shaqaaluhu waxay fahmaan siday ugu adag tahay waalidiinta inay bedelaan dabeecada ilmaha waxayna u muujiyaan rajo ku saabsan awooda ay ku bedeli kuna guulaystaan. Shaqaaluhu wax badan ayay dhegaystaan halkii ay hadli lahaayeen. Fikrada waalidiinta iyo doorkooda waa in si fiican loo raadiyaa loona isticmaalaa. Waalidiinta waxaa lagu dhiirigelinayaa inay muujiyaan dareenkooda, waxay shaki ka qabaan iyo waxay ka welwelsan yihiin arrimahaasna si wanaasgan ayaa wax looga qabtaa. Qoysasku waxay mudan yihiin inay hellaan adeegyada wada-shaqaynta ee wax fiican ka qabanaya taasina waxay ka dhigtaa moodalka wada-shaqaynta mid joogto u shaqaynaya. Taasi markay dhacdana qof walbaa waa ka faaiidaysanayaa.

Xaashida xaqiiqada waalidka waxaa lagu helli karaa oo ay ku qoran tahay luqada badan oo bulshadu ku hadasho waxaana lagala soo bixi karaa websaytka Early Childhood Connections oo ah: www.ecconnections.com.au

Dadaalka

Centre for Community Child Health

Royal Children's Hospital

Johnson & Johnson Professional & Educational Services — Health Care for Life

Waxaa taageeray

Putting Children First — National Childcare Accreditation Council

Australian Government — Department of Family and Community Services

SOMALI